# SU’AALAHA BADANAA LA IS WEYDIIYO: CAAWIMADA SHAQONLA’AANTA XANUUNKA

## SU’AALAHA GUUD EE PUA

**Waxaan isku dayayaa inaan waco lambarka caawimada iimana ogolaanayo inaan sugo, kaliya wuu iska dhigayaa. Sideen u maareeyaa?**

Hadii aad wacdid lambarka PUA oo aad heshid fariinta in dhamaan wakiiladu mashquul yihiin, sababtu waa in lambaradu mashquul yihiin, kuyiiguna buuxo. Fadlan ka akhri Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo si ay kaaga caawiyaan xalinta su’aalaha ka hor intaanad dib usoo wicin marlabaad.

**Maxay ka dhigan tahay hadii aanan ku habooneyn shaqo la’aanta caadiga ah, lakiin macluumaadkaygu aanu ku jirin PUA wali?**

Hadii aanad ku habooneyn shaqo la’aanta caadiga ah, codsigaaga waxa dib u eegaya Waaxda si loo go’aamiyo ku haboonaanshahaaga PUA. Marka la sameeyo go’aaminta ka dib, waxaad ka heli doontaa Waaxda fariin wadata go’aanka ku haboonaanta. Hadii aad ku haboon tahay, waxaad awoodi doontaa inaad dhameystirtid codsigaaga PUA oo aad bilowdid buuxinta cadeymaha sheegashadaada todobaadlaha ah.

**Goo’rmaan codsan karaa PUA?**

Waa inaad codsataa kabka caymiska shaqo la’aanta marka hore si loo go’aamiyo inaad ku haboon tahay kabka shaqo la’aanta ama kabka PUA. Hadii aanad codsan wali shaqo la’aanta caadiga ah, booqo https://vermont.force.com/DOLClaim/s/. Iyadoo ay ku xidhan tahay gudbinta codsigaaga, waxa si degdega ah laguugu gudbiyo inaad

dhameystirtid codsiga sheegashada PUA. Hadii aan laguu gudbin, waxaad u baahan doontaa inaad sugtid DOL in ay eegaan gudbintaada. Marka go'aanka la sameeyo, waa lagusoo ogeysiin doonaa.

**Waan dhameeyey kabkayga caadiga ah ee UI, ma inaad codsadaa baa PUA ama maxaan sameeyaa?**

Hadii aad dhameysay 26 todobaad ee kabka caymiska shaqo la'aantaada oo aad isku dayeysid inaad isticmaashid 13 todobaad oo Caawimada Shaqo La'aanta Xaalada Degdega ah ee Xanuunka (PEUC), waa inaanad isku dayin inaad codsatid PUA. Waxaa suurto gal ah inaad heshid fariin qalad sheegaysa hadii aad isku daydid inaad codsarid maxaa yeelay mar horeba waxaad sameysatay sheegasho shaqo la'aan ah. Ma jiro shay aad u baahan tahay inaad sameysid ilaa iyo Barnaamijka PUEC la hirgaliyo.

**Todobaadadee ayuu PUA daboolayaa?**

waxay siinaysaa badalaad mushahar codsadayaasha ku haboon todobaadkii hore Maarij 15, 2020, marka Amarka Sare ee Barasaab Scot uu hirgalay.

**Ka waran hadii codsigayga kabka caadiga ah ee UI la diiday oo aan helo fariin khalad sheegaysa marka aan isku dayo inaan sii wado codsashada kabka PUA?**

Hadii laguu diiday kabka shaqo la'aanta ma saameynayso ku haboonaanshahaaga kabka PUA. Codsigaaga dib ayaa loo eegayaa Waaxda shaqaalaha ayaana kusoo ogeysiin doonta hadii aad ku haboon tahay inaad codsatid PUA.

**Marka isku dayo inaan dhameystiro codsigayga PUA, wuxuu leeyahay diwaankaygu ma jiro iyo inaan u baahanahay inaan dhameystiro codsiga shaqo la'aanta. Maxaan sameeyaa?**

Hadii aad raacday dhamaan talaabooyinka codsashada PUA (oo ay ku jirto buuxinta codsiga koobaad ee shaqo la'aanta) oo aad helaysid fariin

khalad sheegaysa markaad isku dayeysid inaad xaqiijisid macluumaadka PUA gaaga, tani macneheedu waa in codsigaaga UI u baahan yahay dib u eegista dheeraadka ah ee Waaxda. Ma awoodi doontid inaad dhameystirtid codsiga PUA ilaa iyo dib u eegista la dhameystiro. Waaxda ayaa kusoo ogeysiin doonta ku haboonaan shahaaga.

**Sheegashadayda waa laga garnaqayaa. Waa maxay tani macneheedu?**
Hadii codsigaaga laga garnaqaayo, waxa jira arin sheegashadaada kaasoo u baahan in Waaxdu u baadho arinka si qoto dheer. Nidaamkani waxa bilaabay iyadoo ay ku saleysan tahay jawaabaha codsigaaga koobaad ee shaqo la'aanta. Sheegashadaada waxa loo qaban doonaa nidaamka kala horeynta ee loo helay.

**Waxaan ku noqonayaa shaqada. Miyaan u baahanahay inaan sameeyo wuxuun si aan u ogeysiiyo Waaxda Shaqaalaha?**
Hadii aad shaqada kusoo noqoneysid, uma baahnid inaad ogeysiisid Waaxda wakhtigan. Waa inaad kaliya joojisaa buuxinta sheegashadaada todobaadlaha ah. Hadii aad u dacwooneysid todobaad si buuxda laguu shaqaaleysiiyey, taasi waa ficil wax isdaba marina waana laguu diidi doonaa kabka. Hadii aad shaqeynaysid oo aad gudanaysid shaqada inta lagu jiro todobaadka aad u buuxinaysid kabka UI, waa inaad sheegtaa saacadaha aad shaqeysay iyo mushaharka aad qaadatahay.

## KU HABOONAANSHAHA PUA

**Sidaan ku ogaadaa inaan ku haboonahay PUA?**
Hadii aad tahay qandaraasle madax banaan, iskii u shaqeyste, loo diiday ama aan ku habooneyn kabka shaqo la'aanta ama FPEUC (barnaamijka kabka fidsan), waxaad ku haboonaan kartaa kabka PUA.

**Xaalada noocee ah ayaa iga mabnuucaya PUA?**
Hadii aad awoodid inaad kasoo shaqeysid guriga ood mushahar qaadatid ama helaysid mushaharka fasaxa xanuun ama mushaharka fasaxa kale kuma haboonaan doontid PUA.

Intee inleeg oo lacag ah ayaan u baahanahay si aan u helo uguna gudbo kabka PUA?
Waa inaad qaadatay ugu yaraan $2,871 rubuca ugu lacagta badan ee mudada. Saddexda rubux ee kale mudada, waa inaad kasbatay ugu yaraan 40% intii aad heshay intii lagu jiray rubucii ugu lacagta badnaa. Hadii kale, waxaad ku haboonaan doontaa xadiga kabka ugu yar.

***FAAHFAAHIN SAHABSAN IS U SHAQEYSASHADA***
**Sideen u ogaan karaa inaan ahay iskii isku shaqaaleysiiye?**
Tilmaamaha fadaraalka ee PUA waxay u aqoonsadaan "iskii u shaqeyste" shakhsiyaadka tuursanaantooda dakhliga gudashada adeegyo ganacsiyadooda ah. Tani waxa sidoo kale ku jira qandaraaslayaasha madaxa banaan iyo dadka kale.

**Iskay ayaan isku shaqaaleysiiyey, lakiin waxaan u shaqeeyey shaqaaleysiiye 2019. Halkee ka codsadaa?**
Hadii aad ka heshay in ka badan $4,025 taariikh sanadeedka 2019 shaqaaleysiiye (ama shaqaaleysiiyayaal) oo ka jaray cashuurta mushaharkaaga, waxaad ku haboonaan doontaa kabka shaqo la'aanta. Talaabada koobaad ee go'aaminta ku haboonaanshahaagau waa inaad

dhameystirtid codsiga koobaad ee shaqo la'aanta kaasoo go'aamin doona inaad ku haboon tahay caymiska shaqo la'aanta ama PUA.

**Hadii aan ku noolahay Vermont oo aan iskay iskaga shaqaaleysiiyey gobol kale, halkeen uga dacwoon karaa kabka PUA?**
Waa inaad ka dacwootaa gobolka halka aad markii hore ka shaqeynaysay wkahtigii aad noqotay bilaa shaqada, shaqo yaraan ama aanad awoodin inaad shaqeysid sababtoo ah COVID-1 lana xidhiidhta sabab lagu sheegay qeybta 2102(a)(3)(A)(ii)(I) Xeerka CARES. Hadii aad ka shaqeysay in ka badan hal gobol wakhtigani, waxaad ka dacwoon kartaa mid ka mida goboladaasi.

**Waxaan ka helaa dakhligayga ugu badan shaqadayda labada galinba, lakiin waxaan sidoo kale leeyahay ganacsi. Miyaan la ii tixgalinayaa iska shaqaaleysiiye ujeedooyinka kabka PUA?**
Maya. Tilmaamaha Fadaraalka PUA waxay ku qeyaxayaan shakhsi is shaqaaleysiiyey marka dakhliga koobaad ee shakhsigu ka imanaayo adeegyada ganacsiga shakhsiga.

## *XAALADAHA KU HABOONAANTA*

**Miyaan ku haboonahay PUA hadii aanan waligay horey u shaqeyn ama ay mudo dheer ahayd markii u danbeysay ee aan shaqeeyey?**
Waxaad ku haboonaan kartaa PUA hadii:

- Waxa laguu qorsheeyey inaad bilowda shaqeynta ama hada shaqo ma haysid ama ma awoodid inaad bilowdid shaqo natiijiada COVID-19 awgii
- Shaqo siintaada waa lagaala noqday maxaa yeelay COVID-19 awgii
- Waxaad noqotay masuulka ama daryeelaha koobaad ee qoyska maxaa yeelay masuulkii qoyska ayaa u dhintay COVID-19

**Waxaan ahay shaqaale beer caanood. Miyaan ku haboonahay PUA?**
Haa, shaqaalaha beeruhu waxay ku haboon yahay PUA waana in ay ka bilaabaan iyadoo soo gudbinaya codsiga koobaad ee shaqo la'aanta.

**Miyaan ku haboonahay PUA hadii shaqadaydu ii ogolaato inaan kasoo shaqeeyo guriga oo mushahar qaato?**
Maya. Hadii aad kasoo shaqeyn kartid guriga oo shaqaaleysiiyahaagu mushahar ku siiyo, kuma haboonid PUA.

**Miyaan ku haboonahay kabka PUA hadii aanan shaqeynayn lakiin aan ka helaayo mushahar fasax ama mushahar fasax qaab kale ah shaqaalahayga?**
Waa laga yaabaa. Hadii aad helaysid lacag mushahar fasax oo kala badh ah, waxaad ku haboon kartaa kabka la yareeyey ee xadiga todobaadka (WBA). Hadii mushaharkaaga fasaxu ka badan yahay WBA, kuma haboonaan doontid.

**Miyaan heli karaan kabka PUA hadii aan wali shaqeynaayo lakiin saacadahayga la yareeyey?**
Hadii aad shaqeynaysid saacado kooban COVID-19 awgii oo aad wayday mushaharkii, waa inaad codsataa kabka caymiska shaqo la’aanta. Ku haboonaanshaha shaqo la’aanta ama PUA waa la go’aamin doonaa ka dib markaad codsatid.

**Waxaan shaqeeyey labada galinba waana la iga joojiyey. Lakiin waxaan sidoo kale leeyahay ganacsi loo xidhay COVID-19 awgii, miyaan ku haboonahay PUA?**
Hadii lagaa joojiyey shaqaaleysiintii labada galinba waxaad ku haboon tahay shaqo la’aanta caadiga ah. Hadii aad mar horeba helaysay shaqo la’aanta caadiga ah, ma codsan kartid ama heli kartid kabka PUA.

**Hadii aan kaga maqanahay fasax bilaa mushahar ah oo caafimaad shaqaaleysiiyahayga, oo aanan ku habooneyn shaqo la'aanta gobolka maxaa yeelay ma awoodo ama haleelaayo inaan shaqeeyo, miyaan ku haboonahay PUA?**
Waxay ku xidhan tahay. Hadii fasaxa caafimaadku ku saleysan yahay mid ka mida sababaha COVID-19 la xidhiidha ee lagu taxay qeybta 2102(a)(3)(A)(ii)(I) ee XEERKA CARES, waxaad ku haboonaan kartaa kabka PUA. Hadii xaaladaada aan lagu sheegin mid ka mida sababaha la xidhiidha COVID-19 oo hadii kalena aanad awoodin inaad shaqeysid ama aanad haleelayn shaqada, kuma haboonid PUA.

*AAN KU HABOONEYN*

**Waxaan codsaday kabka shaqo la'aanta caadiga ah oo sheegashadayda laga garnaqaayo oo aan wali jawaab ka helin. Miyaan sidoo kale codsan karaa PUA?**
Maya. Ma codsan kartid PUA hadii hada haysatid codsi lagu diyaariyey garnaqa shaqo la'aanta caadiga ah. Hadii laguu diido kabka caymiska shaqo la'aanta, waxaad ku haboonaan kartaa PUA lakiin ma codsan kartid PUA ilaa iyo go'aamintaasi la sameeyey.

**Hadii aan diido inaan ku noqdo shaqada marka dib uu iigu yeedho shaqaaleysiiyahaygu maxaa yeelay waxaan rabaa inaan helo kabka shaqo la'aanta guud, miyaa ku haboonahay PUA?**
Maya. Hadii aad diidid shaqo haboon si aad codsatid kabka shaqo la'aanta, kuma haboonaan doontid PUA. Macluumaad dheeriya, booqo https://labor.vermont.gov/unemployment-insurance/refusal-return-work-covid-19

**Waan ku haboonahay shaqo la'aanta caadiga ah lakiin ma qaadanayo lacagaha iyadoo ay ugu wacan tahay is kansal gareynta 100 boqolkiiba ah. Miyaan ku haboonahay PUA?**
Maya. Xaaladani, waxaad ku haboon tahay inaad qaadatid shaqo la'aanta caadiga ah waxaana loo tixgaliyaa in ay helayaan lacagaha xataa markaa loo isticmaalo in lagu yareeyo lacag jirta. Kuma haboonaan kartid shaqo la'aanta caadiga iyo PUA.

**Sheegashadaydu waxay leedahay waa lacag dheeriya mana helaayo kabka fadaraalka ee $600?**
Hadii sheegashadaadu tahay lacag dheeraada, Waaxdu waxay u baahan tahay in ay si caadiya u cusbooneysiiso sheegashadaada si ay kuugu ogolaato inaad qaadatid kabka $600 oo fadaraalka ah. Waxaanu si firfircoon uga shaqeynaynaa sheegashooyinkan. Waa inaad sii wadaa inaad dacweysid sheegashooyinkaaga isla iyo marka la cusbooneysiiyo sheegashaadana, lacagaha ayaa lasoo saari doonaa. Fadlan ogow, kabkaaga todobaadlaha ah wali waa lasii joojin doonaa si uu u kansalgareeyo lacagaha dheeraadka ah.

## SU'AALAHA CODSIYADA PUA

**Maxaa dhacaya hadii aan dhameystiro codsigayga koobaad ee kabka caymiska shaqo la'aanta oo aan helo go'aan lacageed $0? Miyaan u baahanay inaan dib u codsado PUA?**
Hadii aanad lacag ahaan ugu habooneyn shaqo la'aanta caadiga ah, waxaad ku haboonaan kartaa PUA. Marka dib u eegista codsigaagu dhamaato, Waaxdu waxay kusoo ogeysiin doontaa hadii aad dhameystiri kartid codsiga PUA.

**Miyaan joojin karaa siina wadi karaa badhtamaha codsigayga PUA?**
Haa. Hadii aanad garaneyn sida su'aal looga jawaabo, ama aad u baahan tahay inaad joojisid oo aad heshid macluumaad dheeraada, waad joojin kartaa kuna noqon kartaa wakhti danbe.

**Sideen u sixi karaa codsigayga ama cadeynta sheegashada todobaadlaha hadii aan si aan ku talo gal ahayn uga jawaabo su'aal ama aan galiyo macluumaad khaldan?**

Waxaad awoodaa inaad badeshid lambarka tilifoonkaaga, ciwaanka, iyo habka lacag bixinta, iyo sidoo kale soo galinta dukumentiyada cashuurta, markaad dhameystiraysid cadeynta sheegashada todobaadlaha ah. Ma badeli kartid jawaabaha codsigaaga wakhtigan. Jawaabaha qaar ayaa u baahan sheegashadu in ay marto nidaamka garnaqista.

**Codsigu wuxuu leeyahay lambarka akoonka bangigaygu maaha sax. Maxaan sameeyaa?**

Hadii lambarka akoonka bangigaagu ku bilowdo ama ku dhamaado siiro, waxa jira khalad nidaamka ah oo aan aqbalin lambarada akoonadaasi. Intaanu ka shaqeynayno inaan xalino arintani, waxaad dooran kartaa in jeeg laguu soo diro. Marka la xaliyo tani, waxaad cusbooneysiin kartaa macluumaadka lacagta wakhtiga xiga ee aad dhameystiraysid cadeynta sheegashaadaada todobaadlaha ah.

**Waxaan isku dayey inaad galo si aan u dhameystiro codsigayga PUA waxaanan u baahanahay inaan badelo furahayga sirta lakiin waligay ma helaayo iimaylka badelista?**

Hadii aad aragtid khaladkan, fadlan iskuday inaad badeshid marlabaad madaamoo arinta la xaliyey 4/24/20. Hadii aad isku dayeysid inaad gashid si aad u dacwootid sheegashada todobaadlaha ah ee shaqo la'aanta adoo isticmaalaya PIN, ma awoodid inaad gashid maxaa yeelay kaasi waa shabakada gaara.

**Maxaa dhacaaya hadii aan bixiyo macluumaad beena ama marin habaabin ah si aan u helo kabka PUA?**

Bixinta macluumaad beena ama marin habaabina si aad u heshid kabka waa wax isdaba marin. Hadii lagugu helo inaad sameysay wax isdaba marin, waxaa ku qabanaya ganaaxyo iyo/ama xukun danbi.

**Waxaan raacay tilmaamaha si aan u dhameystiro codsigayga PUA. Waxaan helay "Sheegasho Aan Ku Habooneyn. Sheegashadaada Caawimada Shaqo La'aanta Xanuunka waxa la go'aamiyey inaanad ku habooneyn inaad heshid wax kab ah mustaqbalka. Hadii aad wax su'aala qabtid, fadlan kala xidhiidh Waaxda Shaqaalaha Vermont (877) 660-7782." Maxaan sameeyaa?**

Hadii aad heshay iimaylkan, waa maxaa yeelay iyadoo lagu saleynaayo jawaabaha aad ka bixisay su'aalaha lagu weydiiyey, waxa la go'aamiyey inaanad ku habooneyn PUA.

**Waxaan dhameystiray codsigayga PUA waxaanan galiyey macluumaadka akoonka bangiga oo khaldan. Sideen u xaliyaa?**

Hadii aad u baahan tahay inaad cusbooneysiisid macluumaadka akoonkaaga bangiga waxaad badeli kartaa habka lacag bixinta markaad buuxinaysid cadeynta sheegashadaada todobaadlaha ah.

**Waxa la ii tixgaliyey in aanan ku habooneyn waxaan rabaa in aan rafcaan ka qaato go'aanka. Maxaan sameeyaa?**

Hadii aad heshay go'aamin inaanad ku habooneyn, kuma haboonid PUA. Hadii aad u maleynaysid intani aanay sax ahayn, waxaad u qoran kartaa dacwad Waaxda Rafcaanka 802-828-4289 ama ugu dir rafcaankaaga Waaxda Shaqaalaha P.O. Box 488, Montpelier, VT 05601-0488. Rafcaankaaga, fadlan ku dar: magacaaga, magaca shirkada, iyo magaca iyo taariikhda dukumentiga lagu dacwoonayo. Marka la sameeyo codsigaaga rafcaanka, waxa lagugu soo ogeysiin doonaa qoraal taariikhda iyo wakhtiga la qorsheeyey dhageysiga.

# CADEYMAHA CASHUURTA EE AY U BAAHAN TAHAY PUA IYO SU'AALAHA MUSHAHARKA

**Waa inaan kusoo diraa dukumentiyadayda 21 cisho gudohood. Goorma ayey ka bilaabmaysaa mudada 21 cisho ah?**

Mudada 21 cisho ah waxay ka bilaabmaysaa markaad dhameysid codsigaaga PUA, maaha markii koobaad ee aad codsatay shaqo la'aanta.

**Markaan kusoo warinaayo mushaharka codsiga PUA, ma waxaan isticmaalaa mushaharka oo cashuurtu ku jirto mise mushaharkoo saafiya?**

Shakhsiyaadka is shaqaaleysiiyey waa in ay isticmaalaan mushahar bilaa Cashuur ah. Dadka kale ee aan is shaqaaleysiin waa in aysoo sheegaan mushaharka oo cashuurtu ku jirto.

**Ka waran hadii la igu siiyo komishan ama inta aan iibiyo, maaha mushahar ama saacadle?**

Hadii lagugu siiyo iibka ama komishan, waxaad galin kartaa mushaharkaaga laba mid meesha mushaharka ama saacadaha, ilaa iyo inta ay leeg yihiin wadarta mushaharka la qaatay saddexda bilood.

**Dukumentiyo cashuur oo noocma ayaa la aqbalaayaa in lasoo galiyo?**

Jadwalka C, Jadwalka E, Jadwalka F: Hadii aad tahay shakhsi is shaqaaleysiiyey ama qof kaligii leh ganacsi oo codsanaya Jadwalka C, Jadwalka E ama Jadwalka F, wata cashuurta dakhliga.

- 1040: Hadii aad isticmaalaysid 1040 cashuurta dakhliga, soo wari mushaharka laaynka 1 ee cashuurtaada dakhliga (tani kuma jirto hawl gabka ama adeegyada bulshada)
- W2: Hadii aad isticmaalaysid W2 dukumentiga cashuurta si aad usoo warisid mushaharka, soo wari mushaharka ku jira sanduuqa 1 ee bayaanka w2
- Ka waran hadii aanan u dacwoon cashuurtaydii 2019 wali?

Hadii aanad u dacwoon cashuurtaadii 2019 wali, waxaad haystaaa 21 cisho oo aad ku sameyn kartid sidaasi. Si kastaba ahaatee, ilaa iyo oo aad kusoo darted dukumentiyo taageeraya, kaliya waxaad heli kartaa kabka xadiga ugu yar.

**Maxaan uga baahanahay inaan soo diro dukumentiyada cashuurta 2019 hadii wakhtigoodii dacweynta cashuurtu aan ahayn wali ilaa iyo Julaa 15?**

Cadeynta cashuurta 2019 waxa loogu baahan yahay maxaa yeelay xadiga kabkaagu wuxuu ku saleysan yahay mushaharka 4 rubuc ee ugu danbeeyey. Bixinta mushaharka 2019 waxay go'aamin doontaa kabka ugu saxsan ee todobaadlaha ah, hana bixin cadeynta intii lagu jiray 21 cisho, kaliya waxaad heli doontaa xadiga kabka ugu yar ilaa iyo aad soo dirtid dukumentiyadaasi. Waxaad haystaa 21 cisho laga bilaabo dhameystirka koobaad ee cosigaaga PUA si aad usoo dirtid dukumentiyadaasi.

# SU’AALAHA LACAG PUA

**Miyey jirtaa mudo la sugaayo ka hor intaanan helin jeega kabkayga koobaad?**

Maya, ma jirto wax mudo sugitaan ah. Si kastaba ahaatee, iyadoo ay ku xidhan tahay cadeynta sheegashaada, waxay qaadan kartaa wakhti dib loogu eego ama lagaga garnaqo sheegashadaada.

**Waan is shaqaaleysiiyey, lakiin waxaan sidoo haystaa shaqo hal galin ah oo aan u qabto shaqaaleysiiye kale. Maxay noqoneysaa xadiga kabka todobaadlahaygu?**

Hadii aad u sameysid sheegashadaada shakhsi is shaqaaleysiiyey ahaan, mushaharkaaga is shaqaaleysiinta ayaa kaliya lagu xisaabin doonaa kabka todobaadlaha ah. Hadii aad sii wadid inaad shaqeysid hal galin waa inaad soo sheegtaa saacadaha aad shaqeysay cadeyntooda todobaadkiiba.

**Miyaan ku haboonahay kabka fadaraalka todobaadlaha ah ee $600 ee codsadayaasha kale ee UI helayaan?**

Haa. Hadii aad ku haboon tahay PUA waxaad sidoo kale ku haboon tahay kabka $600/todobaadkiiba. Uma baahnid inaad sameysid shay dheeraada si toosa ayaa loogu dari doonaa lacagta kabkaaga todobaadlaha ah.

**Miyey laxagta $600/todobaadkiiba ku jiri doontaa lacag gaara ama isku mida?**

Kabka dheeraadka ah ee $600 waxa lagu dari doonaa lacag dhigis isku mida ama jeega kabka todobaadlaha ah. Kabka fadaraalku wuxuu ku xidhan yahay labadaba cashuurta dawlada iyo fadaraalka Hadii aad dooratay in cashuurta lagaa joojiyo, waxa lagu sheegi doonaa xadiga lacagtaada taasi. Hadii aanad dooran, waxa laagaga baahan doonaa inaad sheegtid markaad buuxinaysid cashuurta dakhligaaga 2020.

**Sababma ayaanan u helin kabka dhameyska tiran ee $600?**
Markaad dhameystirtay codsigaaga koobaad, hadii aad dooratay in cashuurta laga saaro xadiga kabkaaga todobaadlaha, cashuurta waxa laga saari doonaa kabkaaga fadaraalka $600 sidoo kale. Dhamaan kabku wuxuu ku xidhan yahay cashuurta gobolka iyo fadaraalka.

**Miyaan ubaahanay inaan buuxiyo si aan u helo lacagta todobaadlaha?**
Haa. Waxaad u baahan tahay inaad codsatid todobaadkasta oo aad rabtid inaad heshid kabka PUA.

- Waxaad buuxinaysaa codsigaaga todobaadlaha ah ee mudada todobaadka. (tusaale, hadii aad sheegatid todobaadlaha Abril 12, waxaad buuxinaysaa kabka todobaadka Abril 5-12.) Markaad sidani sameysid, waxaad cadeynaysaa inaanad shaqo ahayn gabi ahaanba ama badh ahaanba todobaadkaasi.
- Waa inaad qorotaa sheegashadaada todobaadlaha kama danbeyn Jimcaha 4:00 pm. (tusaale, hadii aad bilaa shaqo ahayd Abril 5-12, waxaad qoran kartaa sheegashada laga bilaabo Abril 12, lakiin aan ka danbeyn Abril 17 4pm).
- Waa inaad soo sheegtaa saacadaha aad shaqeysay iyo mushaharka AAD QAADATAY (iyadoon loo eegayn markii lagu siiyey) hadii aad shaqeysay intii lagu jiray todobaadka aad codsanaysid kabka. Ku guul dareysashada inaad sidaasi sameysid waxay ku abuuri doontaa arin sheegashadaada, dib u dhac lacageed, ama ka saarista helitaanka kabka.

**Ma inaan ka bixiyaabaa kabka aan helo cashuurta fadaraalka ama gobolka?**
Haa. Markaad buuxinaysid, waxaad akhtiyaar u haystaa in cashuurta lagaa saaro ama aan aan lagaa saarin, lakiin dhamaan kabka waxa qabanaysa cashuurta fadaraalka ama gobolka

**Goormaa lacagta la isiinayaa?**
Ka dib markaad dhameystirtid codsiga koobaad ee shaqo la’aanta, codsiga PUA, oo aad buuxisay cadeynta sheegashadaada todobaadlaha

ah, lacagtaada waxa lagu diyaarin doonaa 3 cisho shaqo. Waxaad dooran kartaa hab lacag bixin toosa aad u dhiganaysid ama jeeg warqada (dhigasho toosa ama hab degdega).